



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA  
WADAJIR DISTRICT COURT  
MOGADISHU-SOMALIA

Summad: MDWAD/731/2021

TR. 30/10/2021

UJEEDO:- SUGITAAN DHAXALKOOB, CADEYN TARIKO IYO WAKAALADO.

Maanta oo ay taariikhdu tahay 30/10/2021, Waxaa maxkamadda Degmada Wadajir Hor Yimid Markhaatiyaasha kala ah:-

1-) **Cali Maxamuud Maxamed (Cali Baabuur)**, Somali ah, Ku Dhashay Muqdisho, Sanadkii 1967, Ina Faadumo Naxar Cabdi, Lehna Somali Driving License No. 30832.

2-) **Muuse Shire Naaleye**, Somali ah, Ku Dhashay Burco, Sanadkii 1969, Ina Faadumo Aadan Ismaaciil, Lena Somali National ID No. 26906278375967.

Waxayna si Wadajir ah Maxkamadda Horteeda uga Caddeeyeen in uu Geeriyooday Marxuum la oran jiray **MARXUUM NUUR XAAJI JAAMAC**, kuna Geeriyooday ..., 1972, Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in Marxuumka Aabihiis & Hooyadiis ay ka geeri horeeyeen, ifka uga tagay oo dhaxlaya 1- Xaas, 5- Wiil, iyo 1- Gabar, Waxayna kala yihiin sidan soo socota:-

**DADKA:-**

1-Aamina	Xaaji	Axmed	Marxuumad	(Xaaskii Marxuumka)
2-Aziz	Nuur	Jaamac	Degan Canada	Dhashay 1960 (Wiilkii Marxuumka)
3-Khadar	Nuur	Jaamac	Degan Canada	Dhashay 1963 (Wiilkii Marxuumka)
4-Kamal	Nuur	Jaamac	Degan Canada	Dhashay 1969 (Wiilkii Marxuumka)
5-Cumar	Nuur	Jaamac	Degan Canada	Dhashay 1971 (Wiilkii Marxuumka)
6-Mustaf	Nuur	Jaamac	Degan Imraadka	Dhashay 1974 (Wiilkii Marxuumka)
7-Asha	Nuur	Jaamac	Degan Imraadka	Dhalatay 1976 (Gabadhii Marxuumka)

Intaas Kadib Waxay Markhaatiyaashu caddeeyeen in ay Geeriyootay **AAMINA XAAJI AXMED**, Kuna Geeriyootay Imaaraatka Sanadkii 2021, isla markaana ay ka geeri Horeeyeen Aabaheed, Hooyadeed, iyo Seygeedi, Waxayna ifka uga Tagay oo Dhaxlaya Dhaxaltooyo Ka Kooban 5- Wiil, 1- Gabar, Waxayna Kala Yihiin

2-Aziz	Nuur	Jaamac	Degan Canada	Dhashay 1960 (Wiilkii Marxuumada)
3-Khadar	Nuur	Jaamac	Degan Canada	Dhashay 1963 (Wiilkii Marxuumada)
4-Kamal	Nuur	Jaamac	Degan Canada	Dhashay 1969 (Wiilkii Marxuumada)
5-Cumar	Nuur	Jaamac	Degan Canada	Dhashay 1971 (Wiilkii Marxuumada)
6-Mustaf	Nuur	Jaamac	Degan UAE	Dhashay 1974 (Wiilkii Marxuumada)
7-Asha	Nuur	Jaamac	Degan UAE	Dhalatay 1976 (Gabadhii Marxumada)



Waxay kaloo Markhaatiyaashu Caddeeyeen in aysan jirin Cid kale oo Marxuumka dhaxleysa oo Nool ama Geeriyootay, haday noqon lahaayeen Asal Ama Farac.

### **HANTIDA LAGA DHAXLAAYO MARXMUUMKA.**

Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in **MARXUUM NUUR XAAJI JAAMAC**, uu ifka uga tagay Guri dhisan oo ku yaal Xamar Degmada (**Hodan**), Cabirkiisa Guudna uu yahay 708-MQ, Cabirkaas oo kala ah 216-MQ, kuna miliyay W.M.L 1100, Tr. 1/4/1979, & Dhul Fidsi Cabirkiisu yahay 492-MQ, Lena Sabarlog No. **79/42/2021**, iyo Rasiid No. **207892**, kuna wada Taariikheysan 24/1/2021, Kana soo baxay Dowlada Hoose ee Muqdisho, **Ahna Duplicate.**

### **WAKAALADO**

Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa In Dhaxaltooyada Kala ah **1- Asha Nuur Jaamac, 2- Aziz Nuur Jaamac, 3- Khadar Nuur Jaamac, 4- Kamal Nuur Jaamac, 5- Cumar Nuur Jaamac**, ay soo wada Wakiisheen Wakaalkood **Mustafa Nuur Xaaji Jaamac**, Sida Ku Cad **1- Warqad Wakaalad Tiro: SE/AD/10/19/2021, Tr. 28/09/2021**, kana soo baxday Safaaradda J F Soomaaliya ee Abu Dhabi, **2-Warqad Wakaalad Gaar ah**, ay ku Taariikheysan 21/10/2021, kana soo baxday Medina Legal Services, uuna saxiixay madaxa Xafiiska Omar M. Mohamed, Una soo Wakiisheen Dhamaantooda in uu u maamuli Karo, dhaxalkoob u samayn Karo, xafidi Karo, Gadi Karo, Hibeyn Karo, Wareejin Karo, Qofkasta Qismigiisa Ku Wareejin Karo, dhisi Karo, kireyn Karo, ka saari Karo, saxiixi Karo kaalintooda, una doodi Karo una dacwoon Karo oo qareen u qaban Karo, Maxkamadaha dalka hortooda u matali Karo qof waliba qismiga uu ku leeyahay dhamaan hantida dhaxalka ah oo ay ka dhaxleen Aabahood **MARXUUM NUUR XAAJI JAAMAC IYO HOOYADOOD AAMINA XAAJI AXMED.**



**DAMIINU MAAL**

- **Cali Maxamuud Maxamed (Cali Baabuur) & Muuse Shire Naaleye**, Waxay Maxkamadda Ka Hor Cadeeyeen in ay Damiinul Maal Buuxa ka Yihiin, Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Sare Ku Xusan Hadii ay Dhacdo in ay Qariyaan Qof Ka Mid ah Dhaxaltooyada ama ay noqon waayaan dadka sare ku xusan Kuwii Dhabta ahaa, Masuul Buuxana ay Ka Yihiin Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Wakaaladaha Sare Ku Xusan Soo diray.

**=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=**

1- CALI MAXAMUUD MAXAMED (CALI BAABUUR)

2- MUUSE SHIRE NAALEYE

**=SAXIIXA WAKIILKA DHAXALTOOYADA KANA MID AH DHAXALKA=**  
 MUSTAFA NUUR XAAJI JAAMAC
**SUGITAANKA MAXKAMADDA.**

Maxkamadda Markay aragtay Codsiga dhaxaltooyadda, Markay dhageysatay marag furka Markhaatiyaasha, Markay aragtay dukumintiga Guriga ee uu marxuumka ku qoran yahay, Markay aragtay Wakaaladaha sare ku xusan, Waxay Maxkamada Degmadda Wadajir sugeysaa geerida Marxuumiinta Kala Ah **MARXUUM NUUR XAAJI JAAMAC, IYO MARXUUMAD AAMINA XAAJI AXMED**, oo ay dhaxalkooda leeyihiin dadka sare ku xusan oo kaliya, waxay kaloo Maxkamaddu sugeysaa in Dhamaan Dhaxaltooyada ay Wakiisheen **MUSTAFA NUUR XAAJI JAAMAC**, kana mid ah dhaxaltooyada, uuna Wakiil buuxa u yahay Dhamaan dhaxaltooyada, isla markaana uu awood buuxda u leeyahay ku tasarufka Hantida ay ka dhaxleen Marxuumiinta sare ku xusan, Waana Sugitaan dhaxalkoob iyo Wakaalado ansax ah waafaqsan Sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka, Waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee mucaamilaadka.

**KAALIYAHA MAXKAMADDA.**





C/risaaq Cali Cabdi "Caabi"

**GARSOORAHA MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR.**

Dr. Axmed Maxamed Cali



30832  
22/09/2021  
Cali Maxamuud Maxamed  
21/09/2024  
Somali  
02/02/1967  
Mogadishu  
B



JAMHUURIYADDA SOMAALIYA  
جمهورية الصومال  
SOMALI REPUBLIC  
WARAQADDA AQOONSIGA  
بطاقة الهوية  
IDENTITY CARD  
L. Garanka / رقم الهوية / National ID  
26906278275967  
Magaca / الاسم / Name  
MUSE  
SHIRE NALEYE  
Taariikhda dhalashada / الميلاد / Birth  
27 Jun 1969 BURAO  
Taariikhda la bixiyay / الاصدار / Issue  
09 Jul 2018 MOGADISHU  
Taariikhda uu dhacayo / الانتهاء / Expiry  
08 Jul 2023  
Lab / Dheddig / الجنس / Gender  
MALE

